

Xeer-Sharci lamba. 1 ee 5 Abriil 1967

Wax ka beddelida canshuurta korsaarka ah dowladda ee shatiga oo ku qoran qod. 42 ee xeer-sharci lamb 5 ee 5 Nofember 1966

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii la arkay qod. 63 ee Dastuurka;

Kadib markii la arkay qod. 42 ee Xeer-sharci lamba. 5 ee 5 Nofember 1966 oo la xiriirta heerka canshuurta korsaarka ah dowladda ee shatiga dowladda hoose ee adeega ganacsiga;

Kadib markii la garoowsaday baahidda loo qabo in wax laga beddelo heer canshuurta si loo gaaro tiro siman ee canshuurtaasi;

Kadib markii la dhegeystay aragtida Wasiirka Maaliyadda;

Kadib markii la dhegestay Golaha Wasiirada;

WAXAA LA SOO SAARAY

Qod. 1

Canshuurta korsaarka ah ee Dowladda

1. Laga bilaabo 1da Janaayo 1967, heer canshuurta kor saarka ah ee dowladda oo ku qoran qod. 42 ee Xeer-Sharci lamba. 5 ee 5 Nofember 1966 waxaa lagu dabaqi doonaa oo keliya shatiyada laga soo gooyo ama laga soo cusboneysiyo Dowladdaha Hoose;
2. Goobaha kale, heerka canshuurta kor saarka ah waxaa loo bedeley sida hoos ku qoran:

Shati qeybta 1aad	Canshuur	Sh.	So.	300
Shati qeybta 2aad	Canshuur	Sh.	So.	100
“ “ 3aad	“	“	“	75
“ “ 4aad	“	“	“	50
“ “ 5aad	“	“	“	20
“ “ 6aad	“	“	“	10
“ “ 7aad	“	“	“	25

Qod. 2

1. Dowladaha Hoose waxaa la amray in dib ugu celiyaan lacagta canshuurta la kor saaray ee la bixiyey sanadkii 1967 sida ku cad qod. 42 ee Dekreto-sharci lamba. 5 ee 5 Nofember 1966 ee cansbuurta dowladda oo ku qoran qodobka sare ku xusan;
2. Lacagaha ay Dowladaha Hoose ceeliyeen ee khuseysa caanshuurta kor saarka waxaa laga jari doona lacagta la shubay bil walba xafiisyada canshuuraha. Warqadaha ku shubidda lacagtaasi waa in lagu lifaaqo warqadaha guddenka lacagtaasi.

Qod. 3

Sharcigaan wuxuu hirgeli doonaa maalinta ku xigta markii lagu soo daabaco Faafinta Rasmiga ee Jamhuriyadda waxaana la horgelyn doona Golaha Qaranka si loogu beddelo sharci sida ku cad qod. 63 ee Dastuurka.

Muqdisho, 5 Abriil 1967.

Aden Abdulle Osman

Rai'sul Wasaaraha
Abdirizak Haji Hussein

Wasiirka Difaaca
Abdirizak Haji Hussein